

SOO SHEEG WALAAC KU SAABSAN FULINTA SOCDAALKA

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu ka walaacsan yahay tallaabooyinka ICE iyo/ama DHS ee la xiriira fulinta socdaalka, hoos waxaa ku qoran ilaha aad heli karto.

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota

Foomka Warbixinta Tallaabooyinka Federaalka: <https://ag.state.mn.us/Federal-Action/>

Foomkaan waxaa loogu talagalay soo sheegida dhacdooyinka ama saameynta la xiriirta ama ay sababeen tallaabooyinkii federaalka ee dhawaan ka dhacay Minnesota.

USCIS, Xafiiska Mas'uuliyadda Xirfadeed

Foomka Xarunta Isuduwista Daacadnimada ICE: <https://www.ice.gov/webform/opr-contact-form>

Taleefanka: 833-442-3677

ICEOPRIntake@ice.dhs.gov

DHS, Xafiiska Udoodaha Xabsiga Socdaalka

Foomka Diiwaangelinta: <https://myoido.dhs.gov/en-US/>

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu dhibaato la kulmaayo ama uu dhibaato kala kulmay intii uu ku jiray xabsiga socdaalka, Xafiiska U doodaha Detention Ombudsman (Xiriiriyaha Socdaalka) (OIDO) ayaa ku caawin kara.

DHS, Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah iyo Xorriyadda Madaniga ah

Foomka Cabashada: <https://engage.dhs.gov/crcl-complaint>

Cabashooyinka/Codsiyada: 1-866-644-8360

Xogta Xiriirka Laanta deegaanka MN: StPaul.Outreach@ice.dhs.gov

**HALKAAN KA GAL DHAMMAAN
LIFAAQYADA BOGGAN.**



Waxaa lagu heli karaa Ingiriis,
Isbaanish, Hmoob , iyo Soomaali.

SIDA WAKIILKAAGA KOONGAREESKU UU CAAWIN KARO

Xafiiska Angie Craig oo ka tirsan Congresswoman ayaa hadda si firfircoon u caawinaya dadka xiran iyo qoysaska shakhsiyadka xiran.

Marka qof aad jeceshahay la xiro:

- Xafiisku wuxuu ka caawin karaa qoysaska inay eegaan meesha laga helo qofka xiran waxayna la wadaagi karaan su'aalaha ay ka qabaan ICE.
- Xafiisku wuxuu sawirada caddeynta muwaadinnimada u diri karaa xarumaha xabsiyada, wuxuuna wax ka weydiin karaa sii deynta muwaadin Mareykana ah oo xiran.

Tinta badan ee aad macluumaad bixin karto, waa ay ka sii fiican kartaa - duub muuqaal ama cod, sawirro qaado, oo diyaar u noqo inaad bixiso magaca buuxa ee qofka xiran, A-Lambarka, iyo taariikhda iyo wadanka uu ku dhashay.

Macluumaad dheeraad ah oo wax ku ool ah:

- Goorma iyo xaggee lagu xiray? Sabab loo xiray miyaa jirta?
- Waa maxay xaaladda socdaalka ee ay hadda ku sugan yihiin?
- Waa maxay xaaladda socdaalka ee hadda iyo ciwaankooda caadiga ah?
- Waa kuma xubinta ugu dhow qoyska, maxayse yihiin dadka ay la xiriirayaan?
- Ma haystaan matalaad sharci?
- Ma qabaan xaalado caafimaad oo adag oo u baahan daryeel? (Daawadee iyo xaalado nooc ee ah ayuu qabaa?)

Foomka Shaacinta Xogta Qarsoon - Kani waa dukumiintiga ugu muhiimsan ee si habboon loogu farsameeyo.

- Buuxi Foomka Shaacinta xogta qarsoon DHS (Foomka Siideynta DHS 60-001)
- Kuwa xabsiga ku jira waxay dhibaato kala kulmi karaan buuxinta waraaqaha waqtiga saxda ah. Waa wax wanaagsan tahay inaad si firfircoon u siiso xubnaha qoyskaaga foomka sii deynta xogta qarsoon oo saxiixan.

Baahiyaha caafimaad ee maxaabiista:

- U dirista sawirrada daawooyinka dhakhtarku qoro, qoraallada dhakhaatiirta iyo liiska daawooyinka xarumaha lagu hayo.
- Calaamadee baahiyaha caafimaad ee degdegga ah oo soo bandhig walaaca haddii maxbuusku la sheegay inuusan qaadan karin daawooyinkiisa.
 - Fiiro gaar ah: Waxaa dhici karta in maxbuuska la sii daayo haddii xaaladdiisa caafimaad la caddeeyo inay tahay mid daran oo aan lagu hayn karin daryeelka xarunta ICE.

Macluumaadka Xogta Xiriirka Xafiiska Congresswoman Craig:

- Taleefanka: 651-846-2120
- Iimaylka: RepCraigCasework@mail.house.gov
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo: <https://craig.house.gov/casework>

XABSIGA DEEGAANKA

- Soo hel goobta maxbuuska ku xiran yahay adoo ka eegaya Nidaamka Helitaanka Dadka Xiran ICE ee oonleenka ah - <https://locator.ice.gov/odls/#/search>
- Soo hel xaaladda kiiska maxkamadda socdaalka - <https://locator.ice.gov/odls/#/status>
- Ka hel macluumaadka Guddiga Racfaanka Socdaalka - <https://www.justice.gov/eoir/customer-service-initiatives>

ILAHA KALE

Xafiiska Tim Walz iyo Lt. Peggy Flannigan

- Taleefanka: 651-201-3400
- Foomka xogta Xiriirka: <https://mn.gov/governor/connect/contact-us/contact-form.jsp>

Ururada deegaanka iyo kooxaha u dooda dadka:

Qareenka Guud ee Minnesota - <https://www.ag.state.mn.us/>
ACLU - <https://www.aclu-mn.org/>
Xarunta Sharciga Socdaalka Minnesota - <https://www.ilcm.org/>
U doodayaasha Xuquuqaha Aadanaha - <https://www.theadvocatesforhumanrights.org/>
Laanta Socdaalka Minnesota (Minnesota Legal Aid) - <https://mylegalaid.org/>
Shabakada Qareenada Mudawaciinta ah (Volunteer Lawyers Network) - <https://www.vlnmn.org/>
Liiska Gudbinta Hay'adda Socdaalka - Minnesota - <https://www.hamline.edu/sites/default/files/2022-06/immigration-agency-referral-list.pdf>

WAC 9-1-1 HADDII ADIGA AMA QOF KALE AMMAANKIISU HALIS DEGDEG AH KU JIRO.

WAAXDA BOOLISKA WEST ST. PAUL

WAAXDA BOOLISKA WEST ST. PAUL WAXAY:

- ✓ Ka jawaabaan walaaca haddii aad ka baqayso.
- ✓ Waxay xirnaan doonaan dharka ciidanka ama waxay yeelan doonaan calaamado cad oo muuqda oo WSPPD ah (tusaale ahaan: gaariga ciidanka, jaakadda, jaakadaha) marka ay roondada ku jiraan.
- ✓ Ka jawaabaan muuqaal iyadoo la adeegsanayo kamaradaha jirka lagu xirto ee shaqeynaysa waxayna diiwaangeliyaan waxyaabaha ay arkayaan.

WAAXDA BOOLISKA WEST ST. PAUL MA:

- ✗ Waydiiyaan dadka xaaladooda socdaalka.
- ✗ Haystaan awood sharci oo ay ku fuliyaan sharciyada socdaalka.
- ✗ Xiri karaan ama xabsi uma taxaabi karaan dadka sababo la xariira xaaladooda sharci.
- ✗ Qarin karaan aqoonsigeena.

Sharciyada ku xeeran Booliska West St. Paul iyo Hay'adaha Fulinta Sharciga Federaalka

- Booliiska West St. Paul ma hor istaagi karaan ama ma faragelin karaan wakiilada federaalka.
- West St. Paul ma lahan awood ay ku xaqiijiyaan ansaxnimada warqadda baarista federaalka ama warqadda xarigga.

KA HEL DHAMMAAN LIFAAQYADA IYO ILAHA DHEERAADKA AH EE BULSHADA WEBSEEDKEENA WSPMN.GOV/IMMIGRATION-RESOURCES

Waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Isbaanish, Hmoob, iyo Soomaali

